



## Maxey tahey Howsha Xafiiska Dhexe ee Charitē?

Xafiiska Dhexe waxuu Senaatka amar ku siiyay Caumaadda iyo Jawaab Celinta. Howsheeda waxey tahey hubeysi in laga qeyb qaato Horey u ogaashada Cudurka. Saas awgeed waxaa loo baahanyahey Xogta badan:

- Xogta Caruurta ka Diwaangareysan Berlin oo ka qeyb qaadanayo Baarintaanka waxey ka heleyaan Xafiiska Dhexe ee Diwaanka.
- Xogta Dhalaanka Hadda dhashey oo la siiyay Screening-ID Nambar, waxaa laga heleyaa Screening Laboorka.
- Xafiiska Dhexe waxuu ka heleyaa Warbixinta Baarintaanka Dhakhaatiirta Caruurta iyo Dhalinyarada oo Waajib ku ah loona Xilsaarey iney si dhaqsi ugu gudbiyaan Xafiiska Dhexe. Haddii uu Baarintaanka ka dhaco Wax ka baxsan Berlin, markaa waa iney Waalidka u diraan Warqadda Baarintaanka Xafiiska Dhexe.

Xafiiska Dhexe waxuu ka arkayaa xogtada Caruurta aan ka qeyb qaadan Baarintaanka Wakhtiga loogu talagaley. Waxey marti qaadayaan Waalidka Caruurta sida Caruurta loo baaro, waxey Warbixin ka siinayaan Sababta iyo u jeedada Baarintaanka.

Haddii Wakhtiga Casumaada laguu qabtey Dhamaado oo aan lagaa helin Warqadda Baarintaanka waxuu Warbixin u dirayaa Xafiiska Dhexe ee Adeega Caafimaadka Dhalinyarada (KJGD) oo ey u sheegayaan Caruurta aan ka qeyb qaadan Baarintaanka. Waalidka waxaa Guriga ku soo booqanayo KJGD oo la talinayo iyo caawinayo haddii loo baahdo.

Habka waxuu yahey in wax Warbixin ah loo gudbineyn oo ku saabsan Caafimaadka Xafiiska dhexe Habka waxaa lagala tashtey Dadka qaabishan ilaalinta Xogta.

> Waalidka qaaliga ah, Ilaaliyaasha qaaliga ah, ha la yaabinna. Haddii lagu Akhbaar geliyo marki aad gafto Ballanka Baarintaanka. Fadlan u fahan Xasuus laguugu caawinayo oo muhim u ah Caruurtaada.

**Waxaan u rajeynayaa Waalidka iyo Caruurta Mustaqbal wanaagsan!**

## Haddii aad Suáalo qabtid?


Internet
http://rueckmeldewesen-kinderuntersuchungen.charite.de.
www.berlin.de/kindergesundheit
E-Mail zentralestelle@charite.de
Telefoon 450 566 022



Somali
Layout: Charité CFM Foto-Grafik-Video, A. Holm | Fotos: W. Peitz | CC17 | Kindervorsorgezentrum


Casumaad lagama maarmaan ah oo ku saabsan

# Baarintaan sida horey Loogu ogaado Cudurka Caruurta



Ilaalinta iyo Daryeelka Caruurta Berlin

CHARITÉ UNIVERSITÄTSMEDIZIN BERLIN

be Berlin




# Berlin waxey sii xoojisey i laalinta Caruurta Iyo Caafimaadka Caruurta

Caruur kasta waxuu u baahanyahey Bilaw Wanaagsan. Caafimaadka waa kann ugu muhimsan. Jarmalka waxaa ka jira Baarintaan badan ee Caruurta sida Cudurka horey loogu ogaado oo caawinayo. Sida loo ogaado haddii Korintaanka ka xumaado iyo hadduu Cudur qabo. Markaa waxaa loo daaween karaa si haboon oo wakhtiyeesani.

Waxaan dooneynaa Carrurta Berlin oo idil inaan siino Bilaw wanaagsan, waxaan kaloo dooneynaa in ey Caruur kasta ka qeyb qaataan Baarintaanka.

Saas awgeed waxey gaartey Berlin Sharci ah Ilaalinta Caruurta.Waalidka, aan ka qeyb qaadan si Madax banaan ah Baarintaanka horey u ogaanta Cudurka (U4-U9). Waa la casumayaa sida Caruurta loo baaro.

# Maxey Qasab u tahey in Baarintaanka laga qeyb qaato ayadoon wax ka maqneyn?

Saas ayaa horey loogu ogaan karaa Cudurka iyo koriin xumada. Sida loogu daaweeyo Walkhti haboon. Cuduro iyo Koriin xumo waxaa la ogaan karaa marki u gaaro Canuko Sanado gooni ah, taasi waxey tahey in leyku aadiyay Wakhtiga iyo Cudur barista. Haddii xataa ilaa hadder waxba laga helin, waa muhim inaad ka qeyb qaadato Baarintaanka.

Muhim waxaa ah in Wakhti hore la ogaado koriin xumada Dhalaanka iyo Caruurta. Sannadaha ugu horeeyo waa muhim waxi ku saabsan Caafimaadka iyo Korintaanka Caruurta. Xataa Caruurta weyn waa Muhim iney ka qeyb qaataan Baarintaanka. Sida Caruurta Dhib ku ah Hadalka, Aragtida, Wax maqalka ama dhib ku qaba Fiirsashada, waa la Caawini karaa Wakhti hore sida ey ula qabsadaan Kindergarteenka iyo Iskuulka.

Sida looga ilaaliyo Caruurta Infekshin Khatar ah, waa muhim in mar kasta la baara Talaalka.

**Saas awgeed:**

Ka faaídeyso Baarintaanka sida Cudurka mar hore la ogaado taas oo udan ah Caruurta!

# Maxaa loogu baahanyahay Buuga Baarintaanka?

Buuga waxaa lagu qorayaa Natiijada ka soo baxdey Baarintaanka. Hooya kasta waxaa la siinayaa marki laga sii daayo Isbitaalka Buugaas oo kale ee Caruurta loogu tala galey. Haddii aad ka soo guurtey Wadan kale waxaad ka heleysaa Dhakhtarka Caruurta iyo Dhalinyarada. Buuga Baarintaanka Caruurta waa Qasab inaad si fiican u dhaqaaleysid, Marki laga baarayo Cudurka waa in aad tustaa Dhakhtar Caruurta iyo Dhakhtarka Dhalinyrada.

# Waa maxa Screening-ID iyo **Maxaa loo isticmaalaa?**

Screening-ID (SC-ID) waa Tiro qarsoon. Waxey ka koobantahey Laba iyo Toban tiro oo isku xigga oo elh sadex Tiro oo lagu Aqoonsado.
Laga bilaabo I Abriil 2010 Caruurta ku dhashey Isbitaalka oo idil waxaa laga siinayaa Buuga lagu qoro Baarintaanka iyo Foom Warbixin ah SC-ID (Warqad ey ku qorantahey Koodka oo koola leh).
SC-ID waxaa loo isticmaalaa in Dhalaanka dhashey lagu baaro iyo Casumaadda iyo Jawaab celintahey.